

(1)

Adeegga dadweynaha oo u dhexeeya weynaynta waxtarkiisa iyo halista xadgudubka

Mahad Allaa iska leh , Allaha Caalamka oo kitaabkiisa sharafta badan ku yiri:

{هُوَ أَنشَأَكُم مِّنَ الْأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا}

(Isagaana idiinka ahaysiiyey dhulka idinkuna camiray dhexdiisa).

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame, intaas kaddib

Diinta islaamka waa diinta dhisidda iyo camiraadda, wanaagga iyo hagaajinta, risaalooyinka samada waxay u yimaadeen mabaadi'dan sarreeya, wuxuu leeyahay Alle:

(وَقَالَ مُوسَى لِأَخِيهِ هَارُونَ اخْلُفْنِي فِي قَوْمِي وَأَصْلِحْ وَلَا تَتَّبِعْ سَبِيلَ الْمُفْسِدِينَ)

(2)

(wuxuuna ku yidhi Nabi Muuse Walaalkiis Haaruun iiga dambee Qoomkayga oo wanaaji hana raacin jidka mufsidiinta)

Wuxuu leeyahay Alle asoo kasoo guurinaya sayidkeena Shucayb (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

{إِنْ أُرِيدُ إِلَّا الْإِصْلَاحَ مَا اسْتَنْطَعْتُ وَمَا تَوْفِيقِي إِلَّا بِاللَّهِ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ أُنِيبُ}.

(Ma doonayo waxaan wanaajin ahayn, intaan karo, waafajintaydana waxaan Eebe ahayn ma karo isagaana talo saartay xaggiisaana u noqon)

Waxaan shaki ku jirin in ilaalinta adeegga dadweynaha oo ay dowladda dhisayso oo ay hormarinayso ay tahay qaab ka mid ah qaababka hagaajinta, oo waxtarka bulshada oo dhan usoo noqonayo, in laga faa'ideysto qof kuma koobna ama qolo gaar ah, bulshada oo dhan ayaa iska leh, dhamaanteena waan ka faa'idnaa adeegga dadweynaha waa inaan ilaalinaa, waa inaan ka reebnaa kuwa wax halleeya inay halleeyaan ama ay fasahaadiyaan.

Qof kastoo masuul ka ah adeegga dadweynaha waxaa laga rabaa inuu u guto shaqadiisa si daacadnimo leh iyo si sugan, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

(3)
(إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ إِذَا عَمِلَ أَحَدُكُمْ عَمَلًا أَنْ يُتَّقِنَهُ)

(Wuxuu jecel yahay Alle midkiina hadduu camalfalo inuu sugo)

Sidoo kale qofka ka faa'adaysanaya waa inuu u adeegsadaa qaab aan dhib keenaynin ama fasahaad ama xadgudub, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(لَا ضَرَرَ وَلَا ضِرَارَ)،

(dhib ma jiro isdhibna ma jiro)

Sidaas ayaa lagu heli karaa iskaashi bulshada dhexdeeda xagga wanaagga iyo danta guud, wuxuu leeyahay Alle:

{وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَىٰ وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ}.

(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambi iyo colnimo)

Ilaalinta adeegga dadweynaha waa waajib sharci iyo wadani iyo insaani, waajibkan kuma eka ilaalinta kaliya, bal wuxuu gaaraa qiimeynteeda iyo kaalin ka qaadashada hormarintiisa, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(سَبْعُ يَجْرِي لِلْعَبْدِ أَجْرُهُنَّ وَهُوَ فِي قَبْرِهِ بَعْدَ مَوْتِهِ: مَنْ عَلَّمَ عِلْمًا، أَوْ كَرَى نَهْرًا، أَوْ حَفَرَ بِنْرًا، أَوْ عَرَسَ نَخْلًا، أَوْ بَنَى مَسْجِدًا، أَوْ وَرَثَ مُصْحَفًا، أَوْ تَرَكَ وُلْدًا يَسْتَعْفِرُ لَهُ بَعْدَ مَوْتِهِ).

(Toddoba ajarkooda addoonka waa u soconaa geeridiisa kaddib asoo qabrigiisa ku jira: qofkii

(4)

aqoon dadka bara ama webi waasiciya, ama ceel qoda, ama timir tilaala ama masjid dhisa ama musxaf dhaxalsiisa ama wiil u dambidhaafaya ka taga geeridiisa kaddib)

Oraahdiisa (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) : (كَرَى نَهْرًا) waxaa laga wadaa waasiciya waxaa la mid ah biyamareen kasta, waxaa lanaga rabaa inaan nadiifino oon waasicino, ee ma aha inaan ku xadgudubno oo aan ciriirino, waxaa la mid ah waddada guud oo ay habboon tahay inaan ilaalino, ee ma aha inaan ku xadgudubno oon ciriirino, dadka maraya ama inaan ku tuurno qashinka iwm.

Qofkii aan awoodin inuu qiimeeyo faa'idada adeegga dadweynaha waxaa laga rabaa inuu ku boorriyo dadka kale inay sidaas sameeyaan, asoo raacaya oraahda nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

{إِنَّ الدَّالَّ عَلَى الْخَيْرِ كَفَاعِلِهِ}،

(Qofka khayrka tusa waa kan sameeyay oo kale)

Hadduusan awoodin haka joogsado inuu wax halleeyo, wuxuu leyahay Alle (Cazza wajalla):

{إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ الْمُفْسِدِينَ}،

(Alle ma jecla kuwa wax fasahaadiya)

Wuxuu leeyahay Alle:

(5)

{وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ الْفَسَادَ}

(Alle fasahaadka ma jecla)

Sidoo kale dhamaanteena waxaa lanaga raabaa inaan ilaalino oo aan dhaqaalaysano.

Waxaan adkaynaynaa in dhamaan adeegga dadweynaha iyo hantida guud sida mu'asasooyinka iyo dugsiyada iyo isbitaalada iyo waddooyinka, gaadiidka dadweynaha ay yihiin amaano luqunta nagaga jirta oona xisaab ka dambayso, laguma cayaari karo lamana hallayn karo si kaste ay tahay si xunna looma adeegsan karo.

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay anbiyada iyo rususha, sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Waxaan shaki ku jirin in la ilaaliyo adeegga dadweynaha oo aan lagu xadgudbin ay ka mid tahay waddooyinka khayrka, dariiqa liibaanta; sidaa awgeed wuxuu ka dhigay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) inaad joojiso dhibka qeyb ka mid ah qeybaha iimaanka, iyo nooc ka mid ah noocyada

(6)

sadaqada iyo sababaha jannada lagu galo wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(الْإِيمَانُ بِضَعِّ وَسَبْعُونَ أَوْ بِضَعِّ وَسِتُّونَ شُعْبَةً، فَأَفْضَلُهَا قَوْلُ: لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، وَأَدْنَاهَا إِمَاطَةُ الْأَدَى عَنِ الطَّرِيقِ)،

(Iimaanka waa toddobaatan iyo dhowr ama lixdan iyo dhowr qeyb, waxaa ugu fiican oraahda laa ilaaha illallaah, waxaana ugu hooseeya in jidka qashinka laga leexiyo, xishoodkana waa qeyb ka mid ah iimaanka) wuxuu leeyahay rasuulka (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(الْمُسْلِمُ مَنْ سَلِمَ النَّاسُ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ)،

(Muslinka waa kan dadka ay ka nabadgaleen carrabkiisa iyo gacantiisa)

Wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(لَقَدْ رَأَيْتُ رَجُلًا يَتَّقَلْبُ فِي الْجَنَّةِ فِي شَجَرَةٍ قَطَعَهَا مِنْ ظَهْرِ الطَّرِيقِ،
كَانَتْ تُؤْذِي الْمُسْلِمِينَ)،

(Nin ayaan arkay oo jannada ku gadgaddoomaya geed uu waddada ka gooyay dartii oo muslimiinta dhibi jiray).

Wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(تَكْفُ شَرِّكَ عَنِ النَّاسِ فَإِنَّهَا صَدَقَةٌ مِنْكَ عَلَى نَفْسِكَ).

(Shartaada ayaad ka joojinaysaa dadka waa sadaqo naftaada aad ku sadaqaysanayso)

(7)

Maxaa inooga baahi badan inaan fahanno adeegga dadweynaha, inay waajib tahay ilaalintiisa, iyadoo dadka lagu abuurayo mas'uuliyad ka saaran xagga diinta iyo dalka si loo ilaaliyo wadanka lana dhowro awoodihiisa lana kobciyo khayraadkiisa, wuxuu leeyahay Alle:

(فَمَنْ اتَّقَى وَأَصْلَحَ فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ).

(Ciddii dhowrsata oo hagaajisa wax cabsi korkooda ma aha mana murgayaan)

**Ilaahayow ilaali Masar iyo dhammaan dalalka
dunida**